

Badeecadaha Caafimaadka Kabka ah ee
Cigna Healthcare

Sida loo xareeyo sheegasho.

Si deg deg ah oo fudud uga xarayso sheegashadaada
myCigna.com® ama myCigna® App.



Sida loo diyaariyo sheegashadaada

Tixraac **Claim Filing Checklists (Liisaska hubinta ee xereynta sheegashada)** ee heerka badeecada macluumaadka iyo dukumeentiga si aad isugu diyaariso ka hor xaraynta sheegashada. Liis kasta oo hubinta ah ayaa muujinaya dukumentiyada gaarka ah ee loo baahan yahay si loo sameeyo sheegashadaada. Markaad hesho macluumaadka lagama maarmaanka ah, waxaad bilaabi kartaa sheegashadaada.

TALO: Tixgeli inaad xarayso sheegashadaada ka dib markaad dhamaystirto dhammaan daryeelka caafimaadka ee la xiriira dhecadaada caafimaad. Waxaad xarayn kartaa wakhti kasta inta lagu jiro sanadka qorshaha.

Markaad xarayso kadib

Marka dhammaan macluumaadka la codsaday la helo, U doodaha Sheegashada ayaa dib u eegi doona sheegashadaada oo la socon doona haddii macluumaad dheeraad ah loo baahdo si loo sameeyo sheegashada.

Sidee la ii ogeysiinayaa go'aanka?

Haddii sheegashada la oggolaado, waxaad heli doontaa Sharaxaada Dheefooyinka (EOB) ama warqad oggolaansho oo kugula talinaysa go'aanka. Haddii sheegashada la diido, waxaad heli doontaa EOB ama warqad sharaxaysa sababta loo diiday sheegashada iyo tilmaamo ku saabsan sida racfaan looga qaato diidmada. Dukumeentiyada waxaa laga heli doonaa qaybta xaaladda sheegashada ee **myCigna**.

TALO: Iska diwaangeli deebaaji toos ah si aad dhakhso u hesho lacagta dheeftaada. Dheefooyinka waxaa si toos ah laguugu siinayaa ** jeeg ama deebaaji toos ah haddii aad isdiiwaangeliso.

Si aad si fudud ugu xarayso sheegashadaada onlayn:

1. Gal **myCigna.com** Hoosta "Coverage" (Caymiska) ee ku yaal xagga sare ee shaashadda, dooro "Supplemental Health" (Kaabista Caafimaadka asaasiga ah)
2. Hoos ugu sii deg qaybta hoose ee bogga oo guji "Submit a claim" (Soo gudbi sheegashada)
3. Buuxi foomka sheegashada onlaynka

myCigna sidoo kale waxay kuu ogolaaneysaa inaad:

- Iska qorto deebaajiga tooska ah
- Aragto macluumaadka qorshaha Caafimadka Dheeraadka ah ee la gaaryeelay
- Lasocoto heerka sheegashooyinka
- La socoto oo ka jawaabto waraaqaha la isu diro
- Eegto Sharaxaadaha Faa'iidooyinka (EOBs)

 Ka gal onlaynka **myCigna.com** ama **myCigna App**® si aad u xarayso sheegasho.

* Macaamiisha ka yar da'da 13 (iyo/ama waalidkood/mas'uulka) ma awoodi doonaan inay iska diiwaan geliyaan myCigna.com. Shuruudaha isticmaalka abka/dukaanka khadka tooska ah iyo kharashyada sidaha taleefankaaga gacanta ayaa khuseeya.

** Dheefooyinka waxaa si toos ah loo siin karaa qof kasta oo aad magacowdo, sida isbitaal, marka la cayimo.

NIDAAMYADANI WAXAY BIXIYAAN DHEEFO XADDIDAN OO KELIYA. MA AHA CAYMIS CAAFIMAAD OO DHAMAYSTIRAN MANA KAFALA QADAAN DHAMAAN KHARASHYADA CAAFIMAADKA. CAYMISKANI MA BUUXINAYO SHURUUDAHA "CAYMISKA UGU YAR EE MUHIIMKA AH" AMA WAAJIBAADKA SHAKHSI AHAANEED EE HOOS YIMAADA XEERKA DARYEELKA LA AWOODI KARO (ACA). CAYMISKAANI MAAHA MEDICAID AMA CAYMISKA KABKA DAAWADA EE MEDICARE.

Dhammaan alaabooyinka iyo adeegyada Cigna Healthcare waxa si gaar ah u bixiya ama loo maraa shirkado ka hawlgala The Cigna Group.

97964350 03/24 © 2024 Cigna Healthcare. Nuxurada qaar ayaa lagu bixiyay shati.

